

Xarumaha daryeelka aasaasiga ah ee mudnaanta leh

Ma u baahan tahay inaad si degdeg ah u
aragto dhakhtar?



Xarumaha Daryeelka Aasaasiga ah ee mudnaanta leh (Priority Primary Care Centres - PPCCs) waxay bixiyaan daaweyn lacag la'aan ah oo loogu talagalay qof kasta oo qaba dhaawacyo ama jirro degdeg ah.

Dhakhaatiirta PPCC ayaa kaa caawin doona inaad hesho daawaynta aad u baahan tahay si ka dhakhso badan marka loo eego qaybta xaaladaha degdega ah ee isbitaalka.



Waxay daweyn karaan xaaladaha sida caabuqyada fudud, gubashooyinka fudud, murkacashada ama lafaha looga shaki qabo inay jaban yihiin. Adeegyada PPCC waxaa ka mid ah shaybaarada, raajoooyinka iyo farmashiyaha.

Haddii aad qabto dhaawac daran ama jirro, wac nambarka Saddexda Ebar (000). Haddii aadan u baahnayn daryeel degdeg ah, ballan ka qabso dhakhtarkaaga caadiga ah.



Adeegyada PPCC waa u lacag la'aan qof kasta, oo haysta ama aan lahayn kaarka Medicare.



Turjubaano ayaa laga heli karaa PPCC-yada. Ka wac Adeegga Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Service - TIS National) 131 450.



Booqo kanaalka Caafimaadka Wanaagsan (Better Health Channel) si aad u hesho goobaha iyo macluumaad dheeraad ah:
betterhealth.vic.gov.au/priority-primary-care-centres